**UNITED NATIONS** **NATIONS UNIES**

**XAFIISKA QARRAMADA MIDOOBAY U QAABILSAN ARRIMAHA SIYAASADDA SOOMAALIYA**
**UNPOS**

Muqdisho, 26 Janaayo 2012

Asalaamu Calaykum,

Saaxiibayaal,

Aad ayaan u faraxsanahay maanta in aan waraaq idinkaga soo qoro Muqdisho aniga oo jooga xafiiskeyga cusub. Sida laga yaabo inaad maqasheen, maalintii Talaadada ahayd ayaan ka soo guuray Nairoobi una soo guuray Soomaaliya, iyadoo ay ila socdaan qaar ka mid ah shaqaalaheyga muhiimka ah ee ka tirsan Xafiiska Qarramadda Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS). Dhab ahaantii anigu waxaan hadda aaminsannahay in na lagu magacaababa Xafiiskii Qarramada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya- kuna yaallo Soomaaliya. Waxaa laga joogaa bil iyo bar oo keliya muddadii uu ku dhawaaqay Xoghayaha Guud ee Qarramada Midoobay in Xafiiska UNPOS uu u soo guuraayo Soomaaliya, arrintaanna waxaa ammaan xoog leh ku muteystay dadaalka xooggan ee ay sameeyeen saaxiibbadeenna ka tirsan Xafiiska UNSOA, kuwaas oo noo suurtageliyey inaan ku soo guurno waqtigii na loo qabtay gudihiisa, waxaanna saaxiibbadeenna uga mahadcelineynaa taageerradooda aan joogsiga lahayn.

Arrintaani waa tallaabo taariikhi ah, ergeygii gaarka ahaa ee Xoghayaha Guud ee Qarramada Midoobay u Qaabilsanaa Arrimaha Soomaaliya James Victor Gbeho wuxuu ka tagey Muqdisho 1995 tii, xilligaasoo ku beegnayd waqtigii la soo gebagebeynaayey hawlgalkii labaad ee Xafiiskii Qarramada Midoobay ee ka furnaa Soomaaliya (UNOSOM II). Inkastoo Hay’adaha Qarramada Midoobay ay dhammaantooda shaqaale u joogeen dhamman (Gobollada) kala geddisan ee Soomaaliya ayaa haddana waxaan ka xumahay inay ku qaadatay UNPOS muddo dheer inay halkaan si joogto ah ugu soo noqoto. Hadda annaga ayeey nagu xirantahay inaan dib u soo ceshanno waqtigii naga lumay. Waxaan aad ugu faraxsanahay sida diirran ee Dawladda & Dadka Soomaaliyeedba ay igu soo dhoweeyeen Muqdisho. Arrintaan aad ayeey ii taabatay, iina faraxgelisay.

Joogitaanka aan joogno waddanka ayaa hadda noo oggolaan donna inaan u soo dhowaanno dhammaan dadka ay arrimaha khuseeyaan – haddii ay yihiin Hay’adaha Federaalka KMG ah, maamullada kale ee jira, bulshada rayidka ah, NGO yada, ganacsatada, warfidiyeennada iyo dadka Soomaaliyeed ee caadiga ahba. Isla hawlgalka aan maalinwalba isla hawlgaleyno dadka ayaa gacan naga siineysa in aan labada dhinac (anaga iyodadkuba) is fahamno, isulana hawlgalno si wada jir, hindisaad iyo waxtar lehba, xilligaan muhiimka ah ee ka mid ah ee geeddi socodka nabadda.

Soo guuritaanka ay UNPOS u soo guurtay Muqdisho waxaa noo wehliya Xafiisyo aan horey ugu lahayn qaybaha kale ee dalka Soomaaliya ka mid ah, waxaa horey noogu joogay shaqaale Hargeysa iyo Garoowe. Haddii ay xaaladda amniga hagaagto, meela kale oo la degi karana ay diyaar noqdaan, waxaan ballaarin doonnaa joogitaankeenna dalka. Waxaan rabaa inaan ammaan iyo boogaadin u soo jeediyo (shaqaalaheenna) horey u joogay Muqdisho. Lix Hay’adood oo ka mid ah Qarramada Midoobay ayaa horey xafiisyo ugu lahaa Muqdisho. Waxaanna wehliya Hay’adahaan oo iyaguna xafiisyo ku leh Muqdisho, NGOyada, Ururka Midowga Afrika oo si xoog leh u jooga dalka, Ururka IGAD, Jaamacadda Carabta, Ururka

Islaamka Adduunka, Dalka Jabuuti, Itoobiya, Ugaandha, Liibiya, Suudaan, Turki iyo Yaman – dhammaan intaanba xafiisyo ayeey ku leeyihiin Muqdisho. Waxaan rajeynaayaa joogitaankeenna inuu waddada u xaarro sidii xubnaha kale ee bulshada caalamka ka tirsan ugu soo guuri lahaayeen Soomaaliya.

Ugu dambeyntii, tallaabada aan horey u soo qaadnay nooma suurta gasheen haddii aysan ahaan lahayn hawlgalka taariikheed ee ay sameeyeen ciidamada nabad ilaaliyayaasha ee Ururka Midowga Afrika ee jooga Soomaaliya (AMISOM), kuwaas oo, iyagoo la hawlgalaaya ciidamada qalabka sida ee Soomaaliya ku guuleystay inay dib uga riixaan Al-Shabaab magaalada Muqdisho. Waxaan rabaa inaan ammaan u jeediyo geesiyaashaan yaryar ee afrikaanka ah, gaar ahaan kuwa naftoodii ugu qaalisanayd u bixiyey si loo soo celiyo nabadda Soomaaliya.

Manta, calankii Qarramada Midoobay ayaa mar labaad ka dul babbanaaya Muqdisho. Waxaanna noo yaalla inaanu qabanno hawlo badan, waxaanna ku guda jirnaa hirgelintii hawlihii muhiimka ahaa eek u cadda Qoorshe Hawleedka, sidoo kale waxaa u hawlgaleynaa sidii lagu gaari lahaaa hadafkii siyaasadeed ee ugu weynaa ee ahaa dhameynta xilliga KMG ah bisha Agoosto sanadkaan, waxaa kaloo hadda dhibaato nagu haya buuqa ka dhex jira Baarlamaanka iyo hanjabaadaha joogtada ah ee nooga imaaneysa kooxaha argagixisada.. Waxaa na sugaaya in la qabto howlo badan toddobada bilood ee soo socota.

Sidaan horey u soo sheegay, dhameystirka Dastuurka qabyada ah, inta aan la gaarin xilligii loo qabtay ee bisha Maajo, ayaa ah arrinta mudnaanta koowaad aan siineyno xilligaan hadda la joogo. Arrimaha la xiriirka (kooxaha) iyo wada tashiga ku saabsan ayagu way socdaan. Waxaa taageerro ballaaran loo hayaa shirkii Garoowe I ee bishii hore, kaasoo soo saaray taloyin la taaban karo ama cadcad, talooyinkaas oo lagu magacaabay (mabaad'idii Garoowe), talooyinkanna waxay u baahanyihiin hadda in la hirgeliyo. Waxaan hadda qoorsheyneynaa qabsoomidda shirka Garoowe II, si talooyinkii la soo geediyay horey loogu mariyo. Waxaan dadaal ugu jirnaa sidii mabaadi'dii ka soo baxday shirkii Garoowe iyo geeddi socodkiisaba dadka loo soo dhexdhigi lahaa, si loo soo jiito dadweynaha (dood furanna uga yeeshaan) arrimahaan.

Dhibaatooyinka waaweyn ee hadda jira waxaa ka mid ah is marin waaga ka dhex jira xubnaha Baarlamaanka, waxaan ku guubaabiyey mas'uuliinta in madaxda Gobolka (waddamada) iyo bulshada caalamkaba ay dalbanayaan in arrintaan (dhibaatada ka dhex juirta Baarlamaanka) si dhaqsi leh loo xalliyo, sidaan aniga mar walba u xasuusin jirey dhammaan dhinacyada oo dhan,-qas wadayaasha qasaaya geeddi socodka nabadda looma dulqaadanaayo, u hoggaansanaan la'aanta arrimahaanna (waxaa ka dhalanaaya tallaabooyin adag. Inkastoo xaaladda arrimaha banii'aadaminimada ee dalka ee hadda aanan jaraa'idyadda ay hadda si xoog leh hadleeynin, hadana waxaa jira kumanaan dad ah oo weli ku jiraa xaalad khatar ah , una baahan gargaar degdeg ah. Deeqsinimada ay muujiyeen dad badan ayaa gacan ka geysatay horumarinta iyo hagaajinta xaaladda, laakiinse dad badan ayaa weli dhibaato ku jira, annagana waa inaan sii wadnaa inaan ka jawaabno (dhawaaqa ka soo yeeraayo saxiibbadeenna deriska ah). Waxaa weli dhibaato naga haysataa gaaritaanka dhulka Al-shabab banaysay ama ay gacanta ku hayaan, dhulkana dhibaato aya ka jirtaa.

Bulshada caalamka waxay si aad ah ugu hawlantahay arrimaha Soomaaliya, waxayna ku mideysantahay taabba gelinta qoorshe hawleedka. Horraantii bilowgaan waxaan shir u qabtay kooxda caalamiga ah ee la xiriirka iyo la socodka arrimaha (Soomaaliya), kuwaasoo jecleystay horumarka ilaa iyo hadda laga sameeyey hirgelinta Qoorshe Hawleedka. Waxayna soo jeediyeen taloyin waxtar leh, waxaanna hadda ku socdaa shirka kulan madaxeedka Midowga Afrika, kaasoo ka dhacaaya Addis Ababa, arrimaha ugu waaweyn ee laga hadlaayana waxaa kow ka ah arrinta Soomaaliya. Si doo kale waxaanna adkeyn doonnaa talooyinka iyo taageerrada ka soo bixi doonta shirka soo socda ee Kooxda Caalamiga ah ee La Xiriirka Arrimaha Soomaaliya iyo shirka ka dhici donna London bisha Feberaayo. Indhaha adduunkana annaga ayeey na soo eegaayaan.

Iga guddooma salaam diiran

Danjire : Auguistin P. Mahiga.

P.O. Box 48246 – 00100, Nairobi, Kenya Tel: +254 (0) 20 7626815 / 7626880. Fax: +254 (0) 20 7622697